Faallo Kooban 03

Juun 2019

Soo koobid

Soomaaliya waxa ay qaadatay nidaam federaal sanadkii 2004, balse dhismaha maamul goboleedyadu waxa ay bilowdeen 2013. Afar maamul goboleed ayaa la dhisay iyadoo dastuurka kumeelgaarka ah aanu si wanaagsan u kala saareynin awoodaha fulinta ee heerarka kala duwan ee dowladdu leeyihiin. Maadaama dastuurku aanu kala caddeyn awoodaha, hardanka awoodeed ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada waxa uu ahaa welina yahay mid joogto ah. Guddiyada dib-u-eegista dastuurka waxa ay dib-u-eegis ku sameeyeen awood qeybsiga waxana ay talooyin u gudbiyeen baarlamaanka sanadkii 2016, laakiin talooyinkoodii weli lama qaadanin. Maadaama hannaanka awood qeybsigu aanu caddeyn, warbixintan waxa ay soo jeedineynaa talooyin cusub ee la xiriira sida awoodaha iyo masuuliyadaha loogu qeybin karo heerarka kala duwan ee dowladda.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.com

© 2019 Somali Public Agenda

Qeybinta awoodaha iyo masuuliyadaha federaalka ee Soomaaliya

Raad-raac

Soomaaliya waxa ay lahayd dowlad dhexe muddo soddon sano ah (1960 - 1990). Marka laga reebo dadka dega gobollada Bay iyo Bakool, taariikh ahaan nidaamka federaalku ma ahayn rabitaanka inta badan muwaadiniinta.

Taariikhda daadajinta awoodaha ee Soomaaliya waxa ay bilaabatay sanadkii 2000 markii dowladdii kumeelgaarka lagu dhisay Carta, Jabuuti, kadib toban sano oo ay socdeen dagaallo qabiil iyo fowdo. Bulshadii rayidka ee ku kulantay Jabuuti waxa ay ku heshiiyeen Axdi Qaran ee Kumeelgaar ah iyo awood qeybsi ku sameysan qabiil. Axdiga Qaran waxa uu dhiirigeliyay madaxbannaanida gobollada, laakiin dowladdii kumeelgaarka waxa ay ku fashilantay in ay shaqeyso sababo la xiriira hogaamiye kooxeedyadii hubeysnaa ee ka talinayay inta badan dalka.

Kadib dhowr shirar dib-u-heshiisiineed ayaa sanadkii 2004 aqoonyahanno iyo hogaamiye kooxeedyo waxa ay dalka Kenya ku ansixiyeen in la qaato nidaam iyo axdi federaal. Laakiin dowladdii federaalka kumeelgaarka waxa aad u yaraa dhulka ay ka taliso dalka, waxana ay ka shaqeysay kaliya magaalooyinka Jowhar iyo Baydhabo.

Inkastoo nidaamka federaalka la qaatay sanadkii 2004, ma jirin dastuur federal ah. Sanadkii 2006, madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf waxa uu magacaabay Guddiga Madaxa-bannaan ee Dastuurka Federaalka si ay u qoraan dastuur federal ah. Guddiga Khuburada ayaa mar dambe la sameeyay si ay u caawiyaan shaqada guddiga madaxa-bannaan. Dhowr shirar oo la xiriira dastuurka ayaa la qabtay waxana ugu dambeyn ay lixdii saxiixayaal ee roadmap-ka ansixiyeen dastuurka bishii Juun 2012 (Elmi, 2012); hannaanka roadmap-ka waxaa wada saxiixay Sharif Sheikh Axmed (Madaxweynaha Dowladda Federaalka Kumeelgaarka), Sharif Xasan Sheikh Adan (Gudoomiyaha Baarlamaanka Federaalka), Cabdiweli Maxamed Cali (Raysal Wasaaraha DFK), Cabdiraxmaan Maxamed Maxamud (Madaxweynaha Puntland), Axmed Caalin (Madaxweynaha Galmudug), iyo Cabduqaadir Macallin Nuur (hogaamiyana Ahlu Sunna Waljamaaca) bishii Sebteembar 2011 si kumeelgaarnimada looga gudbo. Dastuurka waxaa si kumeelgaar ah ay Golaha Metelaadda Qaran ugu ansixiyeen Muqdisho bishii Ogosto 2012.

Dastuurka kumeelgaarka ah waxa uu qeexayay qaabka ay ku imaanayaan xubnaha baarlamaanka federaalka oo iyagu u doortay Xasan Sheikh Maxamuud in uu noqdo Madaxweynaha Soomaaliy bishii Sebteembar 2012.

Balse, dastuurka waxa uu dib u dhigay arrimo badan oo u baahan wada xaajood iyo sharciyo. Waxa sidoo kale ku jiray mugdi badan oo ay kamid tahay sida awoodaha u kala leeyihiin dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada dhismi doono. Si arrimahan loo caddeeyo, dib-u-eegista iyo qabya-tirka dastuurka waxaa loo xilsaaray Guddiga Lasocodka Baarlamaanka, Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo Wasaaradda Arrimaha Dastuurka.

Inkastoo nidaamka federaalka la qaatay sanadkii 2004, dhisidda maamul goboleedyada waxa ay bilowdeen kadib doorashadii madaxweyne Xasan Sheikh Maxamuud, iyadoo aanay weli kala caddeyn qeybsiga awoodaha heerarka dowladda. Sanadkii 2013, Jubaland ayaa lagu dhisay Kismaayo waxaana kadib dhismay maamullada Koonfur Galbeed (2014), Galmudug (2015), iyo Hirshabelle (2016). Maamulladan waxaa la dhisay xilli dastuurka federaalka ay dib-u-eegis ku socotay, awoodahoodana aanay caddeyn. Baarlamaanka federaalka sidoo kale ma aanu ansixinin maamullada cusub sida ku xusan qodobka 49 (1) ee dastuurka federaalka kumeelgaarka ah.

Sida uu dastuurka kumeelgaarka ah u qeybinayo awoodaha

Masuuliyadaha ay kala leeyihiin dowladda federalka iyo maamul goboleedyada oo aan kala caddeyn waxa ka dhashay hardan awoodeed oo soo noqnoqday ee u dhexeeya labada heer ee dowladeed (inkastoo madaxda heerarka kala duwan oo

hareer maray dastuurka ay qeyb ka qaadatay khilaafka). Bishii Oktoobar 2017, waxa uu khilaafku gaaray heer shan maamul goboleed ay Golaha Iskaashiga Maamul Goboleedyada uga dhawaaqeen magaalada Kismaayo. Bishii Sebteembar 2018, golaha waxa uu hakiyay xiriirka uu la leeyahay dowladda federaalka kadib kulan ay ku yeesheen Kismaayo (Hassan, 2018). Go'aannadan waxa ay ka dhasheen arrimo badan oo isbiirsaday oo ay kamid tahay xasaradda ka jirta Khaliijka iyo madaxda maamul goboleedyada qaar oo taageero ka raadiyay dowlado carbeed.

Mugdiga dastuurka ee awood qeybsiga waa mid isugu jirta gaabis iyo kala caddeyn la'aan si toos ah u abuuray khilaafka. Qodobka 54-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah waxa uu afar awoodood si gaar ah u siinayaa dowladda federaalka kuwaasoo kala ah: (1) arrimaha dibadda, (2) difaaca qaranka, (3) jinsiyadda iyo socdaalka, iyo (4) siyaasadda lacagta. Isla qodobkan ayaa sheegaya in awood qeybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale in mustaqbalka ay ka wada xaajoon doonaan maamul goboleedyada iyo dowladda federaalka. Qodobka 53 (1) ayaa sii jahwareerinaya xaaladda waxana uu sheegayaa in maamul goboleedyada lagala tashado kaalmada dibedda, ganacsiga, cahdiyada ama arrimaha kale ee la xiriira heshiisyada caalamiga ah (The Federal Republic of Somalia, 2012).

Marka lagasoo tago qodobadan iska hor imaanaya, qodobka 52-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah ayaa ilaa 10 awoodood sheegaya in ay wadaagaan dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada. Masuuliyadahan waxa ay kala yihiin (1) ilaha biyaha, (2) beeraha, (3) xannaanada xoolaha, (4) daaqa iyo seeraynta, (5) la dagaallanka nabaadguurka iyo ilaalinta deegaanka, (6) caafimaadka, (7) tacliinta, (8) xiriirinta iyo wada-xaajoodka hoggamiyeyaal-dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer-dhaqameedka, (9) xiriirinta culimada diinta, iyo (10) dhallinyarada (The Federal Republic of Somalia, 2012). Qodobkan waxa uu leeyahay 10-kan awoodood waxa ay u baahan yihiin 'xiriir iskaashi' u dhexeeya dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada. Dastuurrada federaalka ah waxa ay awoodahan intooda badan u yaqaannaan 'awoodo wadaag ah'. Marka lagasoo tago qodobadan kooban, ma jiro hannaan kale ee uu dastuurku ku qeexayo qeybinta awoodaha.

Talooyinka awood qeybinta ee guddiyada dib-u-eegista dastuurka

Si xal loogu helo mugdiga dastuurka kumeelgaarka ah, sanadkii 2016, kahor inta aanu dhamaanin muddo xileedkii madaxweynihii iyo baarlamaankii hore, guddiyada dib-u-eegista dastuurka waxa ay dib-u-eegis ku sameeyeen dhowr cutub ee uu ku jiro cutubka shanaad ee dastuurka (baahsanaanta awoodda xukuumadaha ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya) waxana ay soo jeediyeen taalooyin. Labada aqal ee baarlamaanka 10-aad ayaa loo xilsaaray in ay ka doodaan kana heshiiyaan awood qeybsiga. Balse weli taasi ma dhicin. Somali Public Agenda waxa ay heshay nuqullada dib-u-eegistii ay guddiyada sameeyeen, waxa aan qiimeynay talooyinka guddiyada ee cutubka shanaad, waxana aan wareysannay xubno katirsan guddiyada dib-u-eegista.

Kow, guddiyada dib-u-eegista waxa ay soo jeediyeen in awoodaha iyo masuuliyadaha loo qeybiyo saddex heer ee dowladeed: heer federal, heer maamul goboleed, iyo heer dowlado hoose. Arrinkan waxa looga gol-lahaa in lagu awoodsiiyo dowladaha hoose maadaama dastuurku aanu awood siinin heerka dowladaha hoose, maamul goboleedyadana ay ku guul-darreysteen in ay awoodaha u daadajiyaan degmooyinka.

Labo, guddiyada dib-u-eegista dastuurka waxa ay talo ku bixiyeen in la sameeyo xafiiska isku duwidda howlaha iyo xiriirinta dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, kaasoo hoos tagaya xafiiska Madaxweynaha. Xafiiskan waxaa lagu beddelayaa Guddiga Isku-Xirka Xukuumadaha ee ku xusan qodobka 111F ee dastuurka kumeelgaarka ah. Sida ku xusan dib-u-eegista, waxaa loo arkay guddigan in aanu u madax bannaaneyn shaqadiisa inkastoo aanan guddiga weli la sameyn. Soo jeedinta waxa ay sidoo kale sheegeysaa in sharci kale ee uu baarlamaanka federaalka sameyn doono lagu kala caddeyn doono awoodaha gaarka ah ee xafiiskan.

Saddex, guddiyada dastuurka waxa ay kala qeybiyeen awoodaha iyo masuuliyadaha ay kala yeelanayaan dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Sida ku xusan nuqulka loo gudbiyay Baarlamaanka, guddiyada waxa ay soo jeediyeen in 21 awoodood oo ay gaar u yeelato dowladda federaalka halka 7 awoodood ay gaar u yeelanayaan maamul goboleedyada. Awoodaha u gaarka ah dowladda federaalka ee lagu taliyay waxa ay kala yihiin:

1. Dhowrista iyo difaaca Dastuurka Qaranka
2. Dejinta iyo hirgelinta nidaam siyaasadeedka iyo qorshooyinka heer qaran ee la xiriira hormarinta dhaqaalaha iyo bulshada
3. Dejinta iyo hirgelinta jaangoynta siyaasadda qaranka ee saldhigga u ah caafimaadka, waxbarashada, cilmibaarista iyo tiknoolojiyadda iyo sidaas oo kale ilaalinta iyo dhowrista dhaqanka iyo taariikhda dhaxalgalka ah
4. Dejinta nidaam siyaasadeedka lacagta, maaliyadda iyo maalgashiga shisheeye iyo qorshooyinka
5. Soo saarista shuruuc loo adeegsanayo dhowrista dhulka, iyo kheyraadka kale ee dabiiciga ah, goobaha iyo astaamaha taariikhiga ah
6. Waxay dhiseysaa ayna maamuleysaa difaaca qaranka iyo ciidamada amniga iyo ciidamada booliska federaalka
7. Maamulidda bangiga dhexe, daabacada lacagta iyo qadaadiicda, iyo qaadashada amaahda lacagta, nidaaminta sarrifka lacagaha qalaad iyo lacagta suuqa ku jirta; sharci ayaa go'aamin doono xaaladaha iyo Dowlad Goboleed ku qaadan karo ilaha gudaha
8. Dejinta iyo fulinta siyaasadda arrimaha dibadda; gelitaanka heshiisyada caalamiga ah iyo kuwa labo geesoodka ah iyo dhaqan-geintooda; matalaadda diblomaasiyadda, qunsuliyadaha iyo u qeybsanayaasha arrimaha kala duwan; iyo Qaramada Midoobay
9. Waxay masuul ka tahay horumarinta, maamulidda, iyo xeerarka hawada, tareennada iyo gaadiidka badda iyo hawada iyo wadooyinka waaweyn oo isku xeraayo labo Dowlad Goboleed ama ka badan iyo sidoo kale boostada iyo isgaarsiinta oo ay kamid yihiin adeegyada teleefoonka, internet-ka, warbaahinta iyo qaab kasta oo isgaarsiin ah
10. Go'aaminta iyo kusoo rogidda canshuuro ilaha dakhliga ee gaarka u ah Dowladda Federaalka ka soo saaridda, ansixinta, iyo maamulidda miisaaniyadda Xukuumadda Federaalka
11. Go'aaminta iyo maamulidda ka-faa'ideysiga biyaha, wabiyada iyo harooyinka isku xeraya labo Dowlad Goboleed ama ka badan ama ka gudbaya xuduudaha gayiga qaranka
12. Nidaaminta ganacsiga u dhexeeya Dowlad Goboleedyada iyo ganacsiga dibadda
13. Maamulidda iyo ballaarinta dhammaan hay'adaha maalgeliya federaalka kuwaasoo siinaya adeegyo labo Dowlad Goboleed ama ka badan
14. Gaynta ciidamada difaaca federaalka marka ay ka hesho codsi Dowlad Goboleed si ay u dejiyaan xaalad amni oo sii xumaaneysa oo masuliyiinta Dowlad Goboleedka awoodi waayeen in ay xakameeyaan

15. Soo saaridda shuruucda lagama maarmaanka u ah axsaabta siyaasadda iyo doorashooyinka, si loo dhaqangeliyo xuquuqda siyaasadda ee ku xusan Dastuurkan
16. Soo rogidda xaalad degdeg ah oo lagusoo rogay dalka ama ku kooban qeyb kamid ah iyo ka qaadisteeda markay xaaladdaasi dhamaato
17. Waxay go'aamineysaa arrimaha la xiriira jinsiyadda
18. Waxay go'aamineysaa ayna maamuleysaa arrimaha la xiriira socdaalka, bixinta baasaboorrada, dalkugalka, iqaamadaha, iyo ruqsadaha shaqada, qaxootiga iyo magangalyo doonka
19. Diiwaangelinta ikhtiraacyada ilaalinta xuquuqda halabuurka
20. Dejinta halbeegyo mideysan ee la xiriira cabiraadda iyo miisaanka
21. Soo saaridda shuruuc nidaamisa haysashada hubka

Awoodaha aanan la siinin dowladda federaalka ah waxa loo aqoonsaday in ay noqdaan kuwo ay gaar u leeyihiin maamul goboleedyada. Awoodahan waxa ay kala yihiin:

1. Dejinta nidaam maamuleed lagu xaqiijinayo is-maamul, dimuqraadi ah iyo horumarinta bulshada oo ku saleysan sarraynta sharciga, ilaalinta iyo difaaca Dastuurka Federaalka
2. Soo saaridda iyo ku dhaqanka Dastuur iyo shuruuc u gaar ah Dowlad Goboleedka oo aan ka hor imaaneyn Dastuurka Federaalka
3. Dejinta qorshayaal lagu hormarinayo dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada ee Dowlad Goboleedka
4. Maamulidda dhulalka iyo kheyraadka dabiiciga ah si waafaqsan Dastuurka Federaalka
5. Dejinta iyo uruurinta canshuuro oo ah ilaha dakhliga gaarka u ah Dowlad Goboleedka iyo dejinta iyo maamulidda miisaaniyadda Dowlad Goboleedka
6. Soo saaridda iyo hirgelinta shuruucda ku saabsan shaqaalaha rayidka iyo xaaladahooda shaqo si waafaqsan shuruudaha halbeegyada Dowladda Federaalka
7. Dhisidda iyo maamulidda ciidanka booliska Dowlad Goboleedka si ay u sugaan nabadda iyo xasiloonida Dowlad Goboleedka

Soojeedinta awood qeybsiga dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada waxa ay leeyihiin dhowr cilladood. Marka koowaad, inkastoo ay dhiirrigeliyeen in loo baahan yahay in awoodaha loo qeybiyo heer federal, heer maamul goboleed iyo heer dowlado hoose, waxa ay ku guul-darreysteen in ay awoodo gaar ah siiyaan dowladaha hoose. Degmooyinka lama siinin awoodo u gaar ah, waxana mustaqbalkooda loo daayay maamul goboleedyada. Qaar badan oo kamid ah maamul goboleedyada waxa ay ku fashilmeen in ay awoodaha maamulka iyo maaliyadda u daadajiyaan degmooyinka, waxana ay tani yareyneysaa rajada ah in la helo dowlado hoose oo tayo leh.

Marka labaad, guddiyada waxa ay ka fogaadeen in ay qoraan awoodo wadaag ah oo ay wada leeyihiin heerarka kala duwan ee dowladda. Awoodaha fulinta ee dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada waa kuwo isku tiirsan lamana kala sooci karo. Xaqiiqda ah in xafiis ama guddi lasoo jeediyay in loo sameeyo xiriirkooda iyo iskaashigooda ayaa caddeyn u ah howlaha ka dhexeeya heerarka dowladda. Intaa waxaa dheer, dastuurka kumeelgaarka ah waxa uu qorayaa toban awoodood oo ay tahay in labada heer ee dowladeed iska kaashadaan. In la baabi'iyo awoodahan dibna loo siiyo dowladda federaalka waxa ay sii murjin kartaa xiriirka aan fiicneyn ee u dhexeeya dowladda dhexe iyo maamullada gobollada, ugu yaraan wakhtiga dhaw.

Taariikhda siyaasadeed ee Soomaaliya

Sameynta iyo dib-u-eegista dastuurku ma ahan kaliya mid farsamo. Waxa uu dastuurku ka jawaabaa duruufo siyaasadeed iyo kuwo taariikheed oo u gaar ah dalka. Si lamid ah dalalka kale, Soomaaliya waxa ay leedahay taariikh, dhaqan iyo khibrad u gaar ah oo ay tahay in ay qaabeeyaan nooca dowladnimo ee dalka. In lasoo minguuriyo hannaanka federaal ee dalal kale, oo aanan wax badan la wadaagin Soomaaliya, waxa ay u badan tahay in aanay shaqeynin.

Caqabad weyn ee heysata hannaanka dastuur-sameynta Soomaaliya waa in muwaadiniinta aanan la siin fursad ay ku qeexaan aragtidooda ku aaddan nidaamka federaalka kahor iyo kadib qaadashadiisii. Inkastoo maamul goboleedyo la sameeyay, waxaa jira weli Soomaali aaminsan in nidaamka federaalka aanu ku habbooneyn Soomaaliya. Dadka qaar waxa ay doonayaan nidaam loo daadajiyo adeegyada bulshada, maamulka iyo maaliyadda degmooyinka iyo tuulooyinka. Marka qeyb kamid ah bulshada oo ay ku jiraan siyaasiyiin ay aaminsan yihiin in nidaam federaal aanu ka shaqeyn karin Soomaaliya, waxa ay muujineysaa in loo baahan yahay in si dhab ah looga doodo federaalka. Inta ay Soomaalidu isku khilaafsan tahay in federal la qaato iyo in kale, heshiis laga gaaro awood qeybsi waa ay adkaan doontaa in la gaaro lana hirgeliyo.

In maamul goboleedyadii dhismeen iyadoo uu dastuurku qabyo yahay ayaa caqabad ku noqoneysa in la raadiyo lana hirgeliyo talooyin cusub. Iyadoo aanay jirin waxyaabo xeyndaab u noqonaya awoodahooda, ayay hogaamiyayaasha maamul goboleedyada waxa ay noqdeen madax dowlad dhexe oo kale. Waxa ay sameeyeen wasaarado tiro badan oo inta badan si ka madax bannaan dowladda dhexe u shaqeeya. Maamul goboleedyada awooddooda ma gaarsiisana dhulka ay madaxda u yihiin – waxa ay inta badan ku shaqeeyaan caasimado kumeelgaar ah, khilaaf ayaa dhexdooda ragaadiyay, kamana shaqeynin sidii ay maamulkooda u gaarsiin lahaayeen dhulka ay u taliyaan. Amni xumida iyo itaal-darrida maamul goboleedyada ayaa caqabad ku noqoneysa in laga boxo mugdiga awood qeybsi ee dastuurka. Sidoo kale, waxaa adag in maamul goboleedyada lagu aamino in ay awood siiyaan dowladaha hoose maadaama ay muujiyeen in aanay dooneynin in ay awoodaha maamul u daadajiyaan degmooyinka iyo tuulooyinka.

Khibradda Puntland ayaa tusaale cad u ah arrinkan. Maamulka waxaa la dhisay labaatan sano kahor waxana uu isku arkaa maamul qaan-gaar ah, oo aanan loola dhaqmi karin si lamid ah maamullada dhawaan la dhisay. Siyaasiyiinta Puntland waxa ay taariikh ahaan ahaayeen kuwo u ololeeya in Soomaaliya qaadato nidaam federaal si looga madax bannaanaado maamulka Muqdisho. Howlaha qaar, Puntland si madax bannaan ayay u qabsataa. Tusaale ahaan, nidaamka waxbarasho ee Puntland waa uu ka madax bannaan yahay maamullada kale. Siyaasiyiinta Puntland waxa ay dhawaan diideen soojeedin Wasiirka Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare oo ahayd in ay qeyb ka noqdaan imtixaanka qaran. Caqabadda waxa ay noqon doontaa sida awood loogu qeybinayo maamullo aanan tabar iyo itaal ahaan isku mid ahayn. Puntland waxa ay diidi kartaa in la siiyo awoodo iyo masuuliyado lamid ah maamullada kale.

Arrinta Soomaaliland ayaa iyadana ah caqabad kale. Soomaaliland oo iyadu ku dhawaaqday madax bannaanni sanadkii 1991 qeyb kama aanay ahayn hannaanka dowlad-dhisidda Soomaaliya muddo ku dhaw soddon sano. Siyaasiyiinta Soomaaliland waxa ay dalbanayaan in ay si sharci ah uga go'aan Soomaaliya, wadahadalladii u dhexeeyay Muqdisho iyo Hargeysa-na ay hakad ku jiraan. Waxa ay noqon doontaa caqabad dastuuri ah in lagu heshiiyo awood qeybsi iyadoo aanan jawaab loo helin maqaamka Soomaaliland.

Talooyin tixgelin mudan

Ma jiro hal qaab ee loogu qeybiyo awoodaha iyo masuuliyadaha heerarka kala duwan ee dowladda, sida ay dowladaha federaalka ah awoodaha u qeybiyaanna way kala duwan tahay. Taariikhda iyo bulshada ku nool dalalka ayaa qaabeeya nooca maamul iyo awood qeybsi ee ku habboon. Xaqiiqooyinka siyaasadeed ayaa mararka qaarkood keena in dib-u-habeyn lagu sameeyo dastuurka. Sidaas darteed, Soomaaliya waxa ay u baahan tahay nidaam awood qeybsi oo waafaqsan taariikhda dalka, qaab dhismeedka bulshada iyo xaqiiqooyinka siyaasadeed.

Wakhtiga dhaw, Soomaaliya waxa ay u baahan tahay in awoodaha loo qeybiyo kuwo ay dowladda federaalka gaar u leedahay, kuwo wadaag ah, kuwo maamul goboleedyada u gaar ah, kuwo dowladaha hoose u gaar ah iyo kuwo soo haray. Dowladda federaalka waxaa la siin karaa awoodo u gaar ah oo ay kamid yihiin difaaca qaranka, arrimaha dibadda, siyaasadda lacagta, jinsiyadda iyo socdaalka, boostada iyo isgaarsiinta, kheyraadka dabiiciga ah, duulista hawada, heshiisyada dad dhiibista, hirgelinta heshiisyada caalamiga ah, maraakiibta badda, iyo xisbiyada siyaasadda.

Awoodaha wadaagga ah waxa ay udub-dhexaad u yihiin iskaashiga heerarka kala duwan ee dowladda. Isla shaqeynta heerarka dowladda waa mid aan la hureynin. Howlaha fulinta qaar lama kala sooci karo waana in loo aqoonsadaa in ay yihiin awoodo wadaag ah. Waxaa kamid ah canshuur uruurinta, korontada, ilaalinta deegaanka, biyaha, caafimaadka, waxbarashada, horumarinta warshadaha, ganacsiga, iyo beeraha, guurka iyo furriinka, ilaalinta duurjoogta, iyo daryeelka bulshada. Masuuliyadahan waa in ay wadaagaan dowladda federaalka, maamul goboleedyada, iyo dowladaha hoose.

Dhanka kale, maamul goboleedyadu waxaa lasiin karaa awoodo u gaar ah. Awoodahan waxaa kamid ah doorashooyinka xildhibaannada maamul goboleedyada, doorashooyinka dowladaha hoose, amniga maamul goboleedka, shaqaalaha rayidka maamul goboleedka, iyo caafimaadka bulshada iyo fayadhowrka.

Dowladaha hoose waxaa sidoo kale la siin karaa awoodo u gaar ah sida qorsheynta magaalooyinka, fasaxa dhismayaasha, iyo bixinta shatiyada ganacsi ee degmooyinka.

Ugu dambeyn, awoodaha soo haray – oo ah masuuliyado aanan ku caddeyn awood qeybinta – waxaa la siin karaa dowladda federaalka. Inta badan marka dal markii hore lahaa dowlad dhexe uu qaato nidaam federaal, awoodaha soo haray waxaa la siiyaa dowladda federaalka. Canada, India, iyo Belgium ayaa tusaale u ah dalalka awoodaha haraaga ah siiyay dowladda federaalka (Watts, 1996).

Inkastoo qeybinta awooddaha lasoo jeediyay ay suuragal tahay in aanay aheyn xalka ugu wanaagsan ee caqabadaha awood qeybsiga ee jira, haddana waxaa loo arki karaa hannaan loo dhan yahay kana jawaabayo xaqiiqooyinka siyaasadeed dhowr sabab awgood. Kow, dowladda federaalka waxa ay heleysaa awoodo u gaar ah oo ka badan afarta awoodood ee dastuurka ku qoran. Labo, maamul goboleedyada waxa ay yeelanayaan awoodo u gaar ah oo u damaanad qaadaya in ay gobolladooda u maamulaan si madax bannaan. Saddex, iskaashiga heerarka dowladda wuu xoogeysanayaa maadaama dowladda federaalka, maamul goboleedyada, iyo dowladaha hoose ay iska kaashanayaan howlo muhiim ah sida canshuuraha, caafimaadka, iyo waxbarashada. Afar, dowladaha hoose waxa ay helayaan awoodo u gaar ah, waxa ay sidoo kale cod ku yeelanayaan awoodaha wadaagga ah iyo kuwa maamul goboleedyada.

Wakhtiga fog, marka maqaamka Soomaaliland laga heshiiyo, dastuurka federaalka ayaa dib-u-eegis lagu sameyn karaa si loogu caddeeyo heshiiska lala gaaray Soomaaliland iyo sidoo kale rabitaanka shacabka. Waxa ay noqon kartaa fursad dib loogu eego haddii awood qeybsigii shaqeeyay iyo qodobbada u baahan in la beddelo. Sidaas waxaa sameeyay dalka Nigeria sanadkii 1972. Waxa uu dalku lahaa saddex dowlad goboleed: Lagos colony, Oil Rivers Protectorate, iyo Royal Nigeria Protectorate. Kadib labo sano oo dagaal sokeeye socdeen, shacabka Nigeria waxa ay diideen awood-qeybsiga oo shaqeyn waayay. Sanadkii 1972 waxa ay shacabka Nigeria go'aansadeen in awoodo badan la siiyo dowladda federaalka ah. Dowlado military, dagaallo sokeeye, iyo abuurista maamul goboleedyo cusub oo is biirsaday ayaa waxaa ka dhashay dowlad federal oo xoog badan (Blindenbacher & Saunders, 2006).

Awood qeybsiya lasoo jeediyay waxa uu u baahan yahay wada xaajood iyo heshiis ay gaaraan daneenayaasha siyaasadeed. Inkastoo soojedinteenna ay noqon karto mid ku habboon xaaladda siyaasadeed ee Soomaaliya, waxa ay u baahan tahay heshiis in ay ka gaaraan hogaamiyayaasha federaalka, maamul goboleedyada, iyo daneeyayaasha siyaasadeed ee kale. Guddiyada dib-u-eegista dastuurka ayaa sameyn kara madal looga hadlo arrimahan ama madasha hoggaamiyayaasha qaran ayaa dib loo sameyn karaa si looga doodo loogana heshiiyo arrimaha khilaafka ka jiro ee dastuurka oo ay kamid tahay qeybsiga awoodaha fulinta.

Tixraac

Blindenbacher, R. & Saunders, C., 2006, Distribution of Powers and Responsibilities in Federal Countries, *A Global Dialogue on Federalism Programme,* Volume 2.

Elmi, A., 2012, Revisiting the UN-Controlled Constitution-Making Process for Somalia. *E-International Relations (E-IR),* 2 September.

Hassan, M. O., 2018, *Voice of America,* [Online] Available at: https://www.voanews.com/a/somali-regional-states-suspend-ties-with-federal-government-/4563231.html [Accessed April 2019].

The Federal Republic of Somalia, 2012, *Provisional Constitution,* [Online] Available at: http://hrlibrary.umn.edu/research/Somalia-Constitution2012.pdf [Accessed April 2019].

Watts, R. L., 1996, *Comparing Federal Systems in the 1990s,* Kingston (Ontario): Institute of Intergovernmental Relations of Queen's University.

SOMALI PUBLIC AGENDA
Muqdisho - Soomaaliya
Email:
info@somalipublicagenda.com
Website:
www.somalipublicagenda.com
Facebook.com/somalipubagenda
Twitter: @somalipubagenda
Linkedin: @somalipubagenda
Instagram: @somaipubagenda

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS